



Kotouttamisen
SIB

Finland Ajaanibtu waxay bartaan luuqada finishka iyo cilmiga bulshada ka hor inta ayna u gudbin shaqooyinka. Mar-mar In shaqo la helo wakhti ayey qaadataa. Barnaamijka SIB waxuu ku dadaalayaan in uu si fudud u shaqaaleysiyo dadka ka soo qaygalay barnaamijkan waxbarasho kooban ka bacdi. Barnaamijkani waxuu ku haboon yahay dadka raba in ay si dhakhso ah u shaqo galaan, iyagoo dhinacna wax ka baranaya.

Ciwaankan ka ahkriso oo nagala soo xiriir:
www.koto-sib.fi

FINLAND WAAD KU CUSUB TAHAY WAXAANA RABTAA INAAD KA SHAQAYSID?

*Shaqadu waxayfure u tahay in la dhisto nolol
cusub. Barnaamijka la qabsashada wadanka ee SIB
Waxaad ka helaysaa kaalmo iyo waxbarasho si ay
kuugu fududaato in aad si fudud shaqo ku heshid.*

HADDII AAD TAHAY...

...Qof jira 17-63 sano oo ajaanib ah (wadankiisa kasoo guuray)

...Waxaad macamiil ka tahay Xafiiska shaqada iyo xoogsashada waxaadna iska soo diiwaangelisay xafiiska shaqada inaad shaqo-doон tahay

...Waxaad diyaar u tahay inaad shaqo biloowdid waxbarasho kooban ka bacdi

...Waxaad rabtaa inaad luuqada finishka baratid adigoo shaqaynaaya

...Waxaad ugu yaraan ku qori/ akhrin kartaa luudaada hooyo

Waxaanu shaqooyin kaaga heli karnaa, tusaale ahaan Shaqooyinkan soo socda:

Habka lagu qorsheeyo ama lagu maamulo qalabka shirkada iyo hirgelinteeda (logistics), bakhaareynta iyo tarawalnimma basaska.

Shaqada hoteelka, makhaayada iyo u adeegidda geynta cuntooyinka


Dib u-warshadaynta

Dhismaha

Nadaafadda iyo Hagaajinta hantida dhulka

Warshadaynta

Shaqaalah Kafeteriyada



MAXAAD NAGA HELAYSA?

Waxbarasho

Waxaad baranaysaa xirfaddii aad oga baahneyd meesha aad ka shaqayn doontid. Dalabkaaga shaqo Waanu kuu qiimeynaynaa laakiin wawaanu kuu soo bandhigaynaa shaqooyinka la heli karo wakhtikaas. Waxbarashadan (tababarkan) waxaa loogu talagalay in baahidaada shaqo la buuxiyo.

Shaqo

Anaga iyo shaqobixiyaashu wawaanu raadinay boqolaal shaqo oo ay ka bixi-karaan dadka aan luuqadoodu weli hormarin. Ganacsatadu diyaar ayeey u yihiin inay shaqaaleysiyaan dadkan, haddii aad taqaanid xirfad kugu filan xiisona u haysid shaqada

Kaalmo ku hagaysa

Dadka barnaamijkan kasoo qaybgala waxaa lagu hagaya luuqadaha kala ah: Finishka, ingiriiska, carabiga iyo soomaaliga. Barnaamijkani waxuu kugu hagaya waxbarashada iyo arrimaha ku saabsan shaqooyinka illaa saddex sano, xataa haddii aad shaqo heshid.

Barasho luuqadeed

Barnaamijkan waxaad ku baranaysaa luuqada wadanka adigoo shaqaynaaya oo aan galaas fadhiisan. Markii aad shaqo biloowdid waxaad dhex galaysaa bulshada, qaabkaasna luuqada ayaad ku baranaysaa.

Adeegyada xafiiska shaqada iyo xoogsashda

Inkastoo aad barnaamijkan kasoo qaybgalsid, waxaad macamiil ka noqon-doontaa xafiiska shaqada iyo xoogsashada. Shaqaalah xafiiska shaqada iyo xoogsashada ayaa baadhaaya in aad xaq un leedahay lacagta shaqo la, aanta inta aad ku jirdid waxbarashadatan ama shaqada tababarka ah. Shaqada tababarka ka bacdi, waxaad fursad u leedahay in lagu shaqaaleysiyo oo lugugu siyo mushar u qalma shaqada aad qabaneysid.